SU'AALAHA BADANAA LA WEYDIIYO EE KU SAABSAN RUGAHA CAAFIMAADKA TAKHSUSKA EE KU YAAL ISBITAALADA DADWEYNAHA:

MACLUUMAADKA LOOGU TALAGALAY BUKAANKA

health

Waa maxay rugaha caafimaadka ee takhasusku?

Rugaha caafimaadka takhasuska ee Isbitaalada dadweynaha ee Victoria waxay bixiyaan isticmaalka qiimeynta caafimaadka, dhakhaatiirta dumarka ama qaliinka iyo daryeelka dhakhaatiirta takhasuska leh. Waxay sidoo kale bixiyaan adeegyada la xiriira caafimaadka sida duugida dabiiciga ah(physiotherapy) baaritaanka wiisiteynta leh. Adeegyadan, oo mar marka qaarkood loogu yeero ' bukaan socod', waxaa loogu talagalay dadka aan isbitaalka la jiifin.

Sidee baan uga helaa ballan rugta caafimaadka ee takhasuska leh?

Bukaanka waxaa u gudbiyaa rugaha caafimaadka ee takhasuska dhakhaatiirta guud (GPs) ama dhakhaatiirta kale ee takhasuska leh. Marmarka qaarkood bukaanka waxaa loo gudbiyaa si loola socdo ka dib marka lagu daaweeyo waaxda gargaarka degdega ah ama isbitaalka, ama ka dib markay ilmo dhasho.

Isla marka adeega caafimaadku helo soo gudbintaada, shaqaalaha rugta caafimaadka takhasusku waxay kala siinayaan ahmiyad ku saleysan macluumaadka uu ka soo bixiyey dhakhtarka ku soo gudbinayaa xaaladaada. Waxaa laga yaabaa inaad hesho taariikhda ballan isla markiiba ama waxaa lagu gelinayaa liiska sugitaanka si aad u hesho ballan taariikh danbe.

Rugta caafimaadka ayaa idinkala soo xiriiri doonta adiga iyo dhakhtarkaaga macluumaad ku saabsan natiijadii soo gudbintaada.

Sidee baa laysoo wargelin doona ballanteyda?

Waxaad ka heli doontaa warqad ama taleefan rugta caafimaadka takhasuskasi ay kuu siiyaan ballan. Waxaa laga yaabaa sidoo kale inaad ka hesho waraaqo kale oo la xiriira ballantaada; tusaale dhakhaatiirta qaarkood waxaa laga yaabaa inay kaa codsadaan inaad sameyso baadhitaano khaas ah ka hor ballantaada, sida raajo ama baadhitaan dhiig.

Ilaa intee baan rajeynayaa inaan sugo ballanteyda?

Wakhtiga sugitaanka ee ballamaha way kala duwan yihiin adeegyada caafimaadka iyo dhakhaatiirta takhasuska lehba. Haddii aad saluugsan tahay xagga maareynta xaaladaada intaad sugeyso ballanta, waxaad la hadli kartaa dhakhtarkii ku soo gudbiyey oo aad kala hadli kartaa fursadaha aad sameyn karto ee kuu bannaan.

GP ayaa badanaa ah qofka ugu fiican ee maareyn kara caafimaadkaaga ilaa inta lagugu arkayo adeega caafimaadka. Fadlan la xiriir GP –gaaga haddii aad saluugsan tahay xaaladaada. GP ayaa la talin doona shaqaalaha rugta caafimaadka ee takhasuska leh haddii xaaladaadu ay ka sii xumaaneyso. Xaaladadii degdeg ah, waa inaad wacdaa 000 si ambalaans ay kuugu timaado ama tag waaxda gargaarka degdega ah.

Waxaa laga yaabaa inuu GP –gaagu awoodo inuu kuu soo jeediyo daaweyn ku caawisa inaad sugeyso dhakhtarka takhasuska leh.

Macluumaad noocee ah ayaan ka helayaa rugta caafimaadka takhasuska?

Lambarka taleefanka rugta caafimaadka: Waxaad heli doontaa lambar taleefan oo aad wacdo haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid ballantaada.

Lambarka aqoonsiga bukaanka: Iyadoo ku xiran adeega caafimaadka ee laguu soo gudbiyey, waxaa laga yaabaa inaad hesho lambarka laguugu talagalay ee bukaanka. Markaad soo wacdo isbitaalka, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad lambarkan sheegto. Tani waxay ka caawineysaa shaqaalaha inay eegaan taariikhda ballantaada oo ay ka jawaabaan su'aalahaaga.

Khariirad: Waxaa lagu siin doona khariirad sharxeysa fursadaha gaadiidka, baabuur dhigashada iyo meeshii aad ka heli lahayd rugta caafimaadka takhsuska leh.

Xuquuqda iyo masuuliyaadka bukaanka: Macluumaad ayaa la siin doona sharxaya xuquuqdaada iyo masuuliyadaada bukaanka imanaya rugta caafimaadka takhsuska. Tan waxaa ku jiri doona faahfaahin ku saabsan arimahaaga gaarka ah iyo qarsoodinimada macluumaadka caafimaadkaaga.

Macluumaadka turjumaanka: Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan adeega turjumaanka haddii aad jeclaan lahayd in turjumaan laguu sameeyo. Shaqaalaha ayaa markaa ka dib kuu ballaminaya turjumaan. Fadlan jeegaree warqadaada wakhtiga laguu ballaminayo turjumaanka maadaama ay dhib badan karto in laguu ballamiyo wakhti yar gudihiis. Wax kharash ah oo lagaaga qaadayo ma jiro isticmaalka turjumaanka.

Maxaan sameeyaa haddii faahfaahinta xiriirkeygu is bedelo?

Waa muhiim inaad taleefan u soo dirto ama warqad u soo qorto rugta caafimaadka takhasuska haddii aad bedesho cinwaankaaga ama lambarka taleefankaaga. Tani waxay hubin doontaa in rugta caafimaadku sii wado la xiriirkaaga.

Sidee baan u bedelaa ballanteyda?

Haddii aad u baahan tahay inaad bedesho ballantaada fadlan la xiriir rugta caafimaadka takhasuska leh sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah. Shaqaaluhu wuxuu awoodi doona inuu ballantaada u wareejiyo taariikh iyo wakhti aad kuugu haboon, inkastoo tan laga yaabo inay keento sugitaan dheer.

Fadlan wargeli rugta caafimaadka isla markaad ka warhesho inaadan awoodin timaado.

Haddii aad gafto ballamo adoon u soo sheegin rugta caafimaadka takhasuska, waxaa laga yaabaa inaad dib u bilowdo adoo ka soo qaadanaya gudbin cusub GP -gaaga.

Maxaan sameeyaa haddii aanan u baahneyn ama rabin ballantaygda?

Haddii aadan u baahneyn ballantaada, fadlan wargeli rugta caafimaadka takhasuska leh.

Waxaad ka caawin kartaa in la yareeyo wakhtiga sugitaanka ee bukaanka kale adoo hubinaya in rugta caafimaadku ogaato haddii aadan iman Karin ballantaada.

Ka waran haddii aan leeyahay baahiyo khaas ah?

Isbitaalada waxaa laga yaabaa inay caawiyaan bukaanka leh baahiyaha khaaska ah markay imanayaan ballamahooda rugta caafimaadka.

Haddii maqal ama araga aad wax ka qabtid ama aad u baahan tahay turjumaan, waxaa muhiim ah inaad wargeliso rugta caafimaadka takhasuska leh ka hor ballantaada si caawimaad laguugu diyaariyo.

Xaq miyaan u leeyahay caawimaada gaadiidka?

Bukaanka ka soo safraya goobaha baadiyaha ah:

Qorshaha Caawimaada Gaadiidka Bukaanka Victoria (Victorian Patient Transport Assistance Scheme (VPTAS) wuxuu caawiyaa dadka reer Victoria ee baadiyaha degan ee doonaya inay uga safraan fogaan dheer gurigooda takhasus caafimaad ama daaweynta ilkaha ee dhakhaatiir takhasus oo la xaqiijiyey. Si aad xaq ugu yeelato caawimaad, bukaanku waa inay degan yihiin gobolka baadiyaha oo ay safraan 100 kiilomitir ama wax ka badan oo hal dariiq ah, ama celcelis ahaan 500 oo kilomitir toddobaadkiiba ilaa shan toddobaad ama wax ka badan, si aad uga hesho daaweyn dakhtar takhasus leh oo la aqoonsan yahay.

VPTAS waxay bixisaa waxoogaa caawimaad lacag ah oo labadaba ah safarka iyo hoygaba. Iyadoo kabeysa kharashka, ma bixiso lacagta kaa baxday oo dhan.

Si loo hubiyo caawimaada in la siiyo halka loogu baahi badan yahay, bukaanku waxay xaq u leeyihiin inay ku dalbadaan caawimaada ururada kale lacagta ee diiwaangashan, oo ay ka mid yihiin Wasaaradda Arimaha Dadka dalka u soo halgamay, xaq uma laha inay ku dalbadaan VPTAS.

Caawimaada VPTAS ma khuseyso in:

- Bukaanka ku safra ambalaasta wadada, ambalaasta hawada ama baabuurta taageerada gargaarka degdega ah
- Kharashka ay galeen xubnaha qoyska ee ku soo booqanaya bukaanka meesha lagu daaweynayo
- Kharashaadka kale ee la galo sida gaadhi dhigashada ama e-tags.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii aad ula xiriiri lahayd xafiiska VPTAS, la hadal dhakhtarkaaga GP ama gal website ah:

www.health.vic.gov.au/ruralhealth/vptas/index.htm

Bukaanka degaanka:

Waxaa jira noocyo badanoo gaadiid oo la heli karo, sida Red Cross iyo fulunteeriga bulshada. Caawimaada gaadiidka takhasuska leh ee dadka u baahan baahi sheybaareed. Haddii aad u baahan tahay caawimaad gaadiid fadlan kala hadal GP nooca gaadiidka ee aad u baahan tahay inuu ku geeyo kaana soo qaado ballantaada. Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan gaadiidka rugta caafimaadka ee degdega aheyn waxaa laga helayaa website ka Ambalaaska Victoria ee ah:

www.ambulance.vic.gov.au/Ambulance-Victoria/Other-Services/Clinic-Transport-Services.html

Waa maxay saacadaha rugaha caafimaadka takhasusku?

Rugaha caafimaadka takhasuska waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8.30 subaxnimo ilaa 4.30 galabnimo iyo waxay xiran yihiin fasaxyada dadweynaha. Rugo caafimaad oo khaas ah ayaa waxaa laga yaabaa inay furan yihiin maalin khaas ah iyo wakhti toddobaadka ah.

Maxaan u baahan nahay inaan sameeyo ballantayda ka hor?

Ballantaada ka hor, fadlan hubi inaad:

- U soo qaadato wixii natiijo baadhitaan ah ballantaada
- Sameyso liiska wixii daawooyin ah ama waxyaalo xoojinaya cuntada oo aad qaadato
- Qor wixii su'aalo ah ee aad u heyso dhakhtarka (aad bay kuu caawineysaa inaad tan hore u sameyso).

Maxaan u baahanahay inaan sameeyo maalinta ballanta?

Maalinta ballantaada, fadlan soo qaad:

- warqada ballanta ee aad ka heshay rugta caafimaadka ee takhasuska
- wixii raajooyin khuseeya, sawirada skanka (CT ama ultrasound), baaritaan dhiig ama wixii kale ee natiijo baaritaan ah
- liiska daawada aad hadda qaadatid
- Kaadhkaaga Medicare ka, kaadhkaaga hawlgabka (haddii aad mid heysato) iyo wixii kale ee kaadhadh lacag dhimis ah ee aad heysato
- Cinwaanka GP –gaaga iyo lambarka taleefanka
- Wixii daawo ah ama xoojiyayaasha cuntada ee laga yaabo inaad u baahato markaad soo booqaneyso.
- Alaabta lagu ciyaaro ama buugaagta loogu talagalay carruurta rugta caafimaadka kuu soo raacaya.

Isbitaalo badan ayaa waxay leeyihiin makhaayado ama mishiino cuntooyin fudud oo ku yaal goobtaas, laakiinse waxaad soo qaadan kartaa cuntadaada.

Waa muhiim inaad si taxadar leh u akhrisid waraaqaha aad ka hesho rugta caafimaadka takhasuska ee ku saabsan ballantaada iyo waxyaalaha aad u baahan tahay inaad u soo qaadato ballantaada.

Ma u soo kaxeysan karaa ciduun ballanta rugta caafimaadka takhasuska?

Waad soo kaxeysan kartaa saaxiib, qaraabo ama xannaaneeye ballanta rugta caafimaadka takhasuska.

Haddii aad u baahan tahay inuu qof kugu daryeelo guriga, waa muhiim in xannaaneeyahaagu kuu soo raaco ballanta.

Haddii lagugu daryeelo guryaha xannaanada dadka waaweyn, waxaa la doorbidayaa in xubin ka tirsan shaqaalaha guriga xannaanadu uu kula yimaado ballanta rugta caafimaadka.

Ma la heli karaa baabuur dhigasho?

Meesha bukaanka la dhigo/lagana qaado waxay badanaa ku taal oo u dhowdahay rugaha caafimaadka takhasuska. Adeega caafimaadka wuxuu awoodi doona inuu ku siiyo macluumaad ku saabsan gaadhi dhigashada iyo kharashkiisa.

Maxaan u baahan nahay inaan sameeyo markaan imaado rugta caafimaadka takhasuska?

Markaad timaado, fadlan waxaad tagta miiska soo dhaweynta ee layska saxo soo gelitaanka. Shaqaaluhu waxay jeegareyn doonaan faahfaahintaada waxaana laga yaabaa inay ku weydiiyaan inay arkaan Medicare kaaga ama kaadhkaaga lacagta hawlgabka. Ka dibna waxay kugu toosinayaan goobta sugitaanka ee rugtaada caafimaadka.

Ilaa intee bay ballanteydu qaadaneysaa?

Waxaa lagu talinayaa inaad ugu talagasho ballantaada ilaa laba saac. Dhammaan bukaanka waxaa la siiyey wakhti u gaar ah. Waxaa laga yaabaa inay jiraan hal bukaan socod wax ka badan oo heysta wakhti ballan gaar ah sababtoo ah waxaa jiri doona hal xubin ah oo shaqaalaha ka mid ah wax ka badan inay ka shaqeynayaan rugta caafimaadka wakhtigaas.

Inkastoo ballamaha loogu talagalay wakhti u go'an waxaa dhici kara dhib u dhac. Shaqaalaha waxaa laga yaabaa inay dib u dhigto ka hadalka daaweyn dhib badan ama wiisateynta bukaan, ama waxaa laga yaabaa in looga baahdo si degdeg ah qaybo kale oo isbitaalka ka mid ah. Lacala haddii dib u dhacaan oo kale dhaco waxaa kula socodsiin doona shaqaalaha rugta caafimaadka. Ballan kale ayaa laguu sameyn karaa haddii aadan awoodin sugitaanka ballantaada.

Qorshee inaad ku timaado toban daqiiqo ka hor wakhtigii ballanta laguugu talagalay si aad wakhti u siiso buuxinta wixii waraaqo lagama maarmaan ah in la buuxiyo, khaas ahaan booqashadaada ugu horeysa.

Ardey miyaa i arki doonta?

Waxaa laga yaabaa in bukaan socodka ay arkayaan tiro aqoon yahanada daryeelka caafimaadka ka mid ah, oo ay ku jiraan ardeyda ka socota caafimaadka la xiriira, kalkaaliyayaasha iyo kuwa caafimaadka oo ku jira heerar kala duwan oo tababarkooda ah. Isbitaalada dadweynuhu waa isbitaalada wax dhigista waxaana loo qasdayaa in ardeydu dhexgalaan bukaanka si ay u kordhiyaan aqoontooda shaybaareed. Si kasta ha ahaatee xaq baad u leedahay inaad diido inuu ardey ku arko.

Dhakhtarkaagu waa inuu ku baraa shaqaalahan adiga. Haddii aadan dooneynin inay joogaan shaqaale dheeraad ahi fadlan u sheeg dhakhtarka. Tani sinaba uma saameyn doonto daryeelkaaga.

Ma weydiin karaa su'aalo inta ballanteyda lagu jiro?

Haddii aadan waxba ka fahmin wax lagaala hadlay intii ballantaada lagu jirey, weydiiso in mar labaad laguu sharxo. Waxaad weydiin kartaa dhakhtarka, kalkaalisada ama shaqaalaha caafimaadka la xiriira su'aalo wakhti kasta.

Ka waran haddii aan u baahan nahay warqad caafimaad?

Waa inaad weydiisataa dhakhtarka inta ballantaada lagu jiro warqada caafimaadka haddii aad mid u baahan tahay.

Immisa jeer baan u baahan nahay inaan imaado rugta caafimaadka takhasuska?

Tirada ballamaha aad u baahan doonto waxay ku xirnaan doonaan sababta laguu soo gudbiyey. Adeegyada rugta caafimaadka takhasuska leh waxaa badanaa la bixiyaa oo kaliya wakthtiga aad u baahan tahay daryeelka khibrada leh ama fekerka dhakhtar takhasus leh. Dakhtarku aad ku aragtid rugta caafimaadka ayaa kaala hadli doona inta jeer ee aad u baahan doonto imaanshaha rugta caafimaadka.

Waxaa laga yaabaa in dib laguugu soo celiyo daryeelka dhakhtarkaagii GP ah ama adeeg kale oo bulshadeed markaamnad u baahneyn inaad u timaado rugta caafimaadka takhasuska. Warqad ayaa la soo diri doona GP –gaaga ama adeeg bixiye kale oo ku saabsan daryeelka aad ka heshay rugta caafimaadka takhasuska leh.

Ilaa intee bay shaqeynaysaa u soo gudbinteyda rugta caafimaadka ee takhasuska leh?

U soo gudbintaada rugta caafimaadka takhasuska waxaa laga yaabaa inaysan mid shaqeysa weligeed, shaqaalaha rugta caafimaadka takhasuska ayaa ku weydiin doona inaad dib ugu noqoto GP –gaaga ama dhakhtarka takhasuska leh ee ku soo gudbiyey si aad soo gudbintaada u cusbooneysiiso.

Ka waran haddii aanan lahayn GP?

Dhammaan bukaan socodka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay yeeshaan GP. Meesha dhakhtarka takhasusku uu ka shaqeynaya qaby khaas ah oo caafimaadkaaga ka mid ah badanaa ilaa wakhti go'an waxaa muhiim ah inaad yeelato qof yaqaan dhammaan baahidaada caafimaad.

GP –gu badanaa waa qofka koowaad ee aad arkeyso markaad dooneysid caawimaad ama tallo ku saabsan xaalad caafimaad, qofka kaa caawinaya inaad maareyso caafimaadkaaga markaadan u baahneyn dhakhtar takhsus ama aad u dhaxeyso ballamaha dhakhaatiir takhasus oo kala duwan. Tan waxay noqon kartaa mid aad muhiim u ah inay kaa caawiso inaad caafimaad qabto iyo hubinta wax dhibaatooyin caafimaad ah ama dhibaatada la wiisateeyo loona daaweeyo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.

Maxaan sameeyaa haddii aan wax ka saluugo adeega rugta caafimaadka takhasuska?

Waxaad dhiiban kartaa fekerkaaga ku saabsan daryeelkaaga ama adeega aad ku qaadato qayb kasta oo isbitaalka ah. Tan waxaa laga yaabaa inay noqoto qaabka u hambalyeyn ama cabasho.

Isbitaal kasta oo dadweyne oo Victoria ku yaal wuxuu leeyahay wakiilka bukaanka, magacooda iyo taleefankoodana waxaa ku siin kara adeega caafimaadka. Qofkani waa qofkaad la xiriireysid haddii aad qabtid waxaad saluugsan tahay ama hambelyeyn ku saabsan daaweynta aad ku qaadatay isbitaalka. Wakiilka bukaanka ayaa kula shaqeynaya si aad xal ugu hesho cabasho kasta ama haddii ay lagama maarmaan noqoto, si dheeraad ah arinta u baaraya.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsaan xuquuqdaada iyo masuuliyaadkaaga bukaan ahaan, fadlan gal website ka Xeerka Bukaanka Isbitaalka Dadweynaha ee Victoria ee ah:

www.health.vic.gov.au/patientcharter/patient

Maxaan sameeyaa haddii aan u baahan nahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wax kasta oo la xiriira rugaha caafimaadka takhasuska?

Waxaad kala xiriiri kartaa shaqaalaha rugta caafimaadka takhasuska leh taleefanka shantaraalka isbitaalka ama si toos ah taleefan lambarka ku qoran warqada aad ka heshay rugta caafimaadka ee takhasuska.

Macluumaadka ku saabsan adeegyada rugta caafimaadka ee takhasuska waxaa sidoo kale laga helayaa adeegyada caafimaadka shakhsiyeed ee ku yaal website kooda. Liiska website –yada adeega caafimaadka waxaa laga helayaa:

www.health.vic.gov.au/hospitals/index

tiro bilowyo ah ayaa si wadajir ah ay u bilaabeen Wasaaradda Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka dadweynaha ee Victoria oo qayb ka ah ilstaraatijiyada Cusbooneysiinta Hagaajinta Rugaha Caafimaadka Takhasuska. Shaqaalaha ka socda adeegyada caafimaadka dadweynaha iyo kooxaha xoogga saaraya isticmaalaha waxay bixiyeen macluumaad ku saabsan waxyaalaha khibrada ah ee ay ka heleen isticmaalayaasha rugaha takhasuska isbitaalka dadweynaha ee Victoria.

Jawaabaha su'aalaha badanaa laysweydiiyo (FAQs) ayaa la sameeyey si loo hagaajiyo isgaarsiinta iyo waxyaalaha bukaanku helayaan ee u dhaxeeya rugaha caafimaadka, isticmaalayaasha iyo GP-yada.

Jawaabaha waxaa sameeyey Wasaaradda Caafimaadka iyadoo la tashaneysa wakiilada kuwo badan oo daneynaya arimahan oo ay ku jiraan maamulka adeega caafimaadka, shaybaarada iyo isticmaalayaasha.

Wixii macluumaad dheeraad ah eek u saabsan rugaha caafimaadka fadlan gal:

www.health.vic.gov.au/outpatients

Updated June 2010